



# LIDA Stories

[lidastories.net](http://lidastories.net)

## Sheekada Agostino

LIDA Italia

Billie Cejka Risnes

Mohamed Abdirashid



This work is licensed under a Creative Commons Attribution 4.0 International License.  
<https://creativecommons.org/licenses/by/4.0>



## Sheekada Agostino

LIDA Italia

Billie Cejka Risnes

Mohamed Abdirashid

5

Soomaali



Magacaygu waa Agostino, waxaan ahay 51 jir. Shaqadaydu waa in aan cuntada ku geeyo baaskiil. Waxaan leeyahay laba gabdhood, laakiin badanaa ma wada hadalno. Sababtoo ah Aniga iyo hooyadood hadda ma wada noolin oo waanu kala tagnay.

Waxaan la noolahay hooyaday, maadama  
aanan awoodin inaan bixiyo kirada furiinka  
ka dib. Kiradu aad bay qaali ugu tahay  
magaaladan.






Dhawr bilood ka hor waxaan ka shaqaynaayey goob shirkad ah sidii shaqaale waardiye ah. Waxaan dib u hagaajiyay waxyaalihii jabay, waxaan u qaadaayey sanduuqyo, oo caawinayay marka qof kastaa u baahdo caawinaad. Maalin maalmaha ka mid ah shirkadii ayaa shaqada iga eriday. Maan fahmin sababta.



Wakhti dheer kadib dedaalkayagii oo dhan waa noo hirgalay. Mid ka mid ah shirkadaha waaweyn ee keenista alaabada ayaa ku qasbanaaday inay bixiso ganaax aad u weyn oo ay siiso shaqaalaha shaqooyin joogto ah. Waxay ahayd markii ugu horeysay ee ay ka dhacda meel kasta oo adduunka ah. Waxay u egtahay in arrimuhu ay bilaabmeen inay horumaraan.

Waxaan arkay dad badan oo cunto ku  
 keenaya baaskiil. Anna waan kaxayn karaa  
 baaskiilka, marka waxaan garaacay  
 albaabka shirkad weyn oo alaabaha qaada.  
 Waxay ii soo bandhigeen saddex Euro oo  
 halkii mar ee alaab gayn ah. Waxaan  
 sameeyaa 40 € maalintii, 60 € haddii aan  
 aad u nasiib badanahay oo macaamiishu  
 igu tilmaan.



Si wada jir ah oo ay weheliyaan dad kale oo  
 gaarsiiyayaal ah oo ka socda shirkado kale,  
 waxaan koorso ku saabsan xuuqda  
 shaqaalaha ka qaatay urur maxalli ah.  
 Waxay noo soo bandhigeen la talin sharci  
 oo bilaash ah. Waxaanu u halgamay sidii  
 aan aqoonsi iyo xuuq badan u heli  
 lahayn.





Ma helo fasaxa wax lacag ah, ma jiro mushahar markaan xanuunsado, wax xuquuq ah oo dhan ma haysto. Uma maleynayo inay taasi sax tahay, balse waxaan u baahanahay shaqada. Inta badan shaqaalaha kale waa muhaajiriin ka kala yimid adduunka oo dhan.



Kadib, markii nin 25 jir ah oo gaarsiiye ahaa uu gaadhi ku dhufatay oo uu dhintay. Maamulka ayaa bilaabay inay na ogaadaan markaa. Waase ceeb inay na ogaadaan marka uu dhintay, waxay ahayd ka hor inta aanay dhicin.